



**Division of the
Superintendent**
15701 E. First Ave.
Aurora, CO 80011

Phone
303-344-8060

FAX
303-326-1280

www.aps.k12.co.us

Waalidka, Masuulada iyo Bulshada waxa ka Cusub ee ka yimid Kormeere Munn

Dugsiyada Dad waynaha Aurora:

Ilaa July 2013, waxaan lahaa sharafta u adeegida sidii kormeere APS. Muddada wakhtigan, waxaanu la hadalnay waalidka, shaqaalaha, ardayda iyo bulshadda Aurora si loo barto waxa ka shaqeyna APS iyo waxa loo baahanyahay in la beddelo si loo hubiyo in arday kastaa uu guulaysto.

Wada sheekaysiyadan, mowduuc cad ayaa ka soo baxay. APS waxaa looga baahday in dib loo dhiso nidaamka diyaarka ah si uu si wanaagsan ugu habboonaado arday kasta. Marka la samaynayo isbeddelada, waxaanu rabnaa in aanu dhisno awoodayada sababtoo ah waxaanu haynaa wax badan oo aanu ku faano:

- Aurora Quest K-8 waa mid ka mid ah dugsiyada sida aadka ugu sareeya uga hawlgala gobolka.
- Dugsiya Hoose ee Crawford Maamule Jenny Passchier waa Maamule Qaranka Aadka loo yaqaano ee Sanadkan.
- APS waxay ku hogaamisaa gobolka bixinta shahaadooyinka ardayda ee xirfadaha iyo xirfadaha u diyaar ahaanshaha kulliyada.
- APS waxay shuraako la tahay City of Aurora iyo ururada bulshada si ay u abuurto “Xarunta Soo dhowaynta” si loo caawiyo lambarka kobcaya ee qaxootiga iyo ardayda muhaajiriinta ah iyo qoysaska.

Si kastaba ha ahaatee, waa in aynu abuurnaa isbeddel sababtoo ah ardaydayadu ma haysato guul tacliimeed oo la mid ah sida kuwa ardayda gobolka.

- APS afar sano wakhtiga qalan jebinta qiimaynta 55.8%, taas oo aan la aqbali karin wax ka hoosaysa celceliska gobolka ee 77%.
- Ardayda APS waxay helaan dhibco celcelis ahaan ah 17 dhanka ACT oo la barbardhigo dhibacaha 20.1 ee gobolkoo dhan.
- Keliya 46% ee APS ardayda fasalka saddexaad waxay ku wanaagsanyihiin akhriska, marka 72% ay ku wanaagsanyihiin akhriska gobolkoo dhan.
- . Marka soo soo xaadirka ardayga iyo ka qayb galku uu sareeyo, waxaanu uga baahanahay ardayda gudaha fasalka si loo hubiyo guusha.



**Division of the
Superintendent**
15701 E. First Ave.
Aurora, CO 80011

Phone
303-344-8060

FAX
303-326-1280

www.aps.k12.co.us

APS 2020: Qaabaynta Mustaqbalka

Si wax looga qabto caqabadaha, waxaanu kala shaqaynay bulshaddayada in aanu horumarino qorshe farsamo oo cusub, *APS 2020: Qaabaynta Mustaqbalka*, kaas oo horumariya himiladayada: *Arday kastaa waxa uu qaabeeyaa mustaqbalka*.

Waxaanu ku dhammaystiri doonaa himiladayada iyaddo la marayo saddex hadaf oo fudud. Arday kastoo APS waxa uu haysan doonaa:

- Qorshaha mustaqbalkiisa ama keeda
- Qaybo xirfada ah si loo hirgeliyo qorshihiisa ama keeda
- Aqoonsiyada albaabada furan

Abuurista Isbeddelka Si loo Kordhiyo Waxbarashada Arday Kasta, Maalin Kasta

Sidii qayb farsamada qorshaha ah, waxaanu bilownay barnaamijyo badan horumarsan iyo hababka lagu horumaryo dugsiyada oo loo kordhiyo guul gaadhida tacliimeed. Waxaanu dib u abaabulnay. Ilaha degmooyinka dib ayaanu u qoondaynay \$6.9 milyan si aanu toos ugu taageerno dugsiyadayada, waxaanu horumarinay habab cusub oo lagu shaqaaleeyo hogaamiyayaal cusub oo dugsiyada ah, oo waxaanu sii wadnaa in aanu horumarimo farsamooyinka lagu shaqaaleeyo oo lagu helo macalimiin kala duwan iyo shaqaale.

Sababtoo ah ardaydu waxay ka yimaadeen in ka badan 130 wadan oo waxay ku hadlaan in ka badan 130 luqaddood, sidoo kale waxaanu la shaqaynaynaa macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha si aanu u soo jiidno awoodaha kala duwan oo uu arday kastaa keeno fasalka si loo barbaariyo guusha ardaydoo dhan.

Bulshooyinka Isku Abuubulay is ay U Gaadhaan Wanaag

Dugsiyada xataa u baahan ilo dheeraad ah in si degdeg ah loogu horumariyo guul gaadhida, waxaanu horumarinay qorshe dhammaystiran oo loogu yeedho Bulshooyinka isku Abaabulay Si ay u Gaadhaan Wanaag, CORE waxay raacdaa qaybo farsamooyin yididiilo leh iyo jadwal wakhti awood u leh dugsiyada si loo abuurto isbeddelo muhiim ah kuwaas oo horumarin doona guulaha tacliimeed ee arday kasta.

Arday Kasta Waxa uu Qaabeeyaa Mustaqbal Guul leh

Waxaanu sii wadi doonaa in aanu dhisno shaqadan si aanu u hubino in arday kastaa uu qaabeeyo mustaqbal guul leh. Si loo barto waxbadan oo ku saabsan dib u habbaynta waxbarashada APS, booqo aps2020.aurorak12.org/reform.

Keligayo ma qaban karno shaqadan muhiimka ah, waxaanu kugu marti qaadaynaa in aad nala shaqayso si aad u caawiso kordhinta guul gaadhida ardayga, Haddii aad jeclaan lahayd in aad barato wax ku saabsan fursadaha mutadawacnimada ah, fadlan soo wac 303-365-5819, lambarka gudbinta. 28947. Waad ku mahadsantahay taageeradaada iyo iskaashigaaga sii socda.

Rico Munn
Kormeeraha